



Wararkii u dambeeyey ee ciyaaraha: Alex Slenning oo Dugsiga Wilson wax ka bartaa wuxuu ku guuleystay koobka orodka ee gobolka

Alex Slenning wuxuu noqday orodyahankii ugu horeeyey ee ka tirsan Dugsiga Sarre ee Wilson kuna guuleysta orodka gobolka ka dib markii uu dhammaan ka guuleystay 140 qof oo kale oo orodkaas kula tartamayey koobka tartanka Class 6A magaalada Eugene maalintii Sabtida.

Slenning, wuxuu ku jiraa fasalka 12naad isaga oo orodka 5,000 mitir oo ka dhacay Kulliyada Lane ku orday muddo dhan 15 daqiiqo, 41 ilbidhiqsi waxayna guushu ku raacday 7 ilbidhiqsi. Guushani uu guuleystay Slenning waxay timid markii saddexaad ee uu ku guuleysto si isdabajoog ah Tartanka Ciyaaraha Dugsiyada Portland.

Guusha tartanka orodku ee wiilashu ay helaan koobka marka laga yimaado guushii ugu dambeysay ee Ian Burgess oo Dugsiga Sarre ee Franklin ku guuleysta Class 5A sanadkii 2010. Orodyahankii ugu dambeeyey ee ku guuleystana Class 6A wuxuu ahaa Bryce Burgess oo wax ka baran jiray Dugsiga Sarre ee Franklin sanadkii 2007. Koobka uu qaatay Slenning waa kii tobnaad ee orodka wiilasha ee Tartanka Ciyaaraha Dugsiyada Portland.

Waxa iyagunna Slenning ku soo biiray inay ka mid noqdaan tobankii orodyahan ee ugu horeeya Lammi Kalil oo ku guuleysatay inay noqoto orodyahanka sideedaad kuna orday 15:59 oo fasalka 12naad Dugsiga Sarre ee Roosevelt. Orodyahanada Iskuulka Franklin kooxdiiisu waxay ku guuleysteen kaalinta saddexaad tartankii ka dhacay Lane. Will Eaton oo dhigata fasalka 12naad wuxuu soo galay kaalinta 22naad, Solomon Duke oo fasalka 11naad wuxuu isna galay kaalinta 24naad, iyo Simon Walsh oo isna ku guuleysta kaalinta 26naad ee kooxda Quakers.

Tartankii gabdhaha ee Class 6A, waxa kaalinta 10naad gashay Kyla Becker oo fasalka 11naad ee Dugsiga Sarre ee Lincon. Annelies Quinton oo fasalka 9aad iyana waxay ku guuleysatay kaalinta 17naad, iyada oo hal kaalin ah ka horeysay Francesca Lerulli oo fasalka 11naad ee Dugsiga Sarre ee Wilson ah.

Kubada Cagta ee gabdhaha: Dugsiga Sarre ee Lincoln wuxuu ku guuleystay kaalinta saddexaad tartanka ciyaaraha iskuulada Portland iyaga oo u gudbay wareega labaad ee ciyaaraha Class 6A, iyada oo maalintii Sabtidii Cleveland ku badisay 2-1. Gwynn Llewelyn oo fasalka 11naad ayaa u dhaliyey goolkii ay guusha ku hantiyeen kooxda Cardinals ee Cleveland, iyaga oo ka aargutay guuladaradii bishii Sebtember 28keedii lagaga badiyey Cleveland 1-0.

Kooxdii ui tartameysay Lincoln No. 12 waxa ay la ciyaaro doonaan ciyaarhanada ugu sareeya Jesuit 7:00 habeenimo. Maalinta Tallaadada waxa ay fursad u helayaan inay u gudbaan ciyaarta koobka ee maalinta Sabtida dhacaysa. Iskuulka Jesuit waxa wuu qaranka kaga jiraa kaalinta labad sida ay qortay joornoolka USA Today iyaga oo ciyaartoygii la ciyaarayey kaga dhibco badnaa wareegan 76-1. Iskuulka Linclon waxa weeye kooxda ciyaartoyga ee PIL ee gaaray wareegii labad ee gobolka taasi oo kaliya iskuulka Grant gaaray 2012.

Kooxda kale ee ciyaaraha PIL isugu soo baxay maalintii Sabtida wareegii afraad waa Grant, oo Sunset kagaga badiyey 2-1.

Kubada Cagta ee wiilasha: Tartanka Kooxaha Ciyaartowga (PIL) waxa ay u diri doonaa wareeg labaad ee 6A markii afraad ka dib markii Grant ka badiyey North Salem si qurux badan, wuxuu ku guuleystay 2-1 ciyaartii taasi oo kubad laga soo laaday meel dheer. Kooxda iskuulka ee Generals waxay ku guuleysteen 6-5 iyaga oo rigoore ay laadeen kagaga badiyey

Kooxda u tartameysay Grant No. 3 waxa ay la ciyaari doonaa Westview No.2 maalinta Tallaadada ah saacadu marka ay tahay 7:00 habeenimo. Kooxda Generals waxay ay isku dayayaan inay noqdaan kooxda tartanka ciyaaraha PIL afar sano timiday ciyaaraha kama dambeysta ah; waxa ay ku biiri doonaa kooxdii Grant ee sanadkii 2014 ku guuldareystay koobka, iyo kooxda Linclon ee sanadkii 2015 ku guuleystay koobka gobolka.

Football: Lincoln iyo Grant waxa ay u soo gudbeen wareegii labaad ee ciyaaraha kama dambeysta ah Class 6A oo lagu guuleysanayo Jimcaha. Kooxda Linclon waxay ay heshay 242 yaardi iyo lix goo loo uu dhaliyey Nick Ostmo oo fasalka 11naad ah, waxa ay ka guuleysteen Lakeridge 49-38. Kooxda Cardinals waxay ay la ciyaari doontaa South Medford 7:00 habeenimo. Maalinta Jimcaha ayuu wareegii labaad dhacayaa.

Kooxda Grant maquuniyeen bilowgiiba 47-13 iyaga oo gurigooda lagu ciyaarayey Mcminnville. Grant Ewell Jr. oo fasalka 12naad iskuulka Grant ah ayaa la orday ilaa 11 yaardi iyo labo gool, wuxuu la soo noqday 30 yaardi oo kubadi ka dhacday isaga oo rabay inuu u dhaliyo kooxdiiisa Generals oo ku ciyaaraya West Salem maalinta Jimcaha saacadu marka ay tahay 7:00 habeenimo.

ABBAALMARINHA TARTANKA CIYAARAHHA (PIL)

Tartankii ciyaaraha PIL waa la soo gabogabeeyey dhammaan kooxihii ku tartamaey ee ciyaaraha dayrta todobaadkii la soo dhaafay. Halkan hoose waxaa ku soo gudbineynaa magaalada oo dhan cidii ku guuleystay abbaalmarin, taasi oo ay u codeeyey tababarayaasha tartanka:

Football ([fiiri kooxaha oo dhammeystiran](#))

Ciyaaryahanada sanadka - Weerarka: Demarques Singleton, Grant. **Difaaca:** Tyrehl Vaivao, Jefferson.

Tababaraha-Tababare/xigeenka sanadka: Randy Heath, Grant; Eric Fraser, Cleveland

Kubada cagta ee gabdhaha ([fiiri iyada kooxaha oo dhammeystiran](#))

Ciyaaryahanka sanadka: Ella Burke, Cleveland

Tababaraha sanadka: Emily Ngan, Cleveland

Kubada cagta ee wiilasha ([fiiri kooxda oo dhammeystiran](#))

Labada Ciyaaryahan ee sanadka: Alex Meija, Madison; Henry Temple, Lincoln

Tababaraha sanadka: Kurt Krohn, Madison

Kubada Kolleyga ([fiiri kooxda oo dhammeystiran](#))

Labada Ciyaaryahan ee sanadka: Kylie Ristvedt, Cleveland; Libby Lazzara, Lincoln.

Tababaraha sanadka: Ken Henry, Madison.

-Mike Tokito